

TALOOYIN & TILMAAMO

ILAYSKA NOLASHA



Samatar Saxardiid Maxamuud (Ereysame)

Daabacaddii koowaad

1444

2023

Qoraa:

Samatar Saxardiid Maxamuud
(Ereysame)

Talooyin iyo Tilmaamo

Talooyin iyo Tilmaamo

© Xuquuqda buuggani waxa ay u sugantahay qoraaga. Waxa ka reeban in loo isticmaalo hab aan loogu talo galin ama laga unug dheegto nuqul ka mid ah iyada oo aan ogolaanshiyo laga haysan qoraaga.

2023

Tusmada buuga

Mawduuca

- I. Hibeyn
 - II. Mahadnaq
 - III. Hordhac
 - IV. Afeef
1. Gaboodka aan galdaloolka laheyn
 2. Baraha nolosha
 3. Aqoon la'aani waa iftiin la'aan
 4. Awooda dahsoon
 5. Samirka
 6. Da'da dahabiga ah
 7. Akhlaada suuban
 8. Dilaaga qarsoon

Hibeyn

Waxa aan u hibeynayaa buuggan dhamaan ummada muslimiinta ah gaar ahaan ummada af-soomaliga ku hadasha. Si gaar ah waxa aan ugu hibeynaya buuggan Talooyin iyo Tilmaamo waalidkaygii idhalay ee isoo koriyey oo kala ah: **Aabo Saxardiid Maxamuud Daahir iyo Hooyo Faadumo Cismaan Yuusuf.**

Sida oo kale waxa aan u hibeynayaa dhalinyarada reer Somaliland ee doonaya in ay ku guulaystaan nolosha adduun iyo ta aakhiraba. Waxa aanan hilmaameyn inaan u hibeeyo asxaabtayda aanu wax soo wada baranay iyo kuwa aanu hadda wada joogno.

Mahadnaq

Mahad dhamaanted waxa ay u sugan tahay Allaha weyn ee inoogu deeqay nimcooyinka aynaan soo koobi karin guud ahaan. Mahadnaq Eebbe kadib, waxa lagama maarmaan ah mahadnaqa waalidkayga igusoo tabcay iguna soo barbaariyey dhaqanka suubban.

Mahadnaq gaara, waxa aan u diraya dhamaan macalimiintayda meel kasta oo ay joogan hadday yihiin macalimiintii dugsiga hoose/dhexe, sarre iyo weliba macalimiintii jamacadda oo ah furaha aqoontayda iyo hagaha horumarkayga.

Sida oo kale waxa aan mahad kal iyo lab ah u diraya macalinkayga **Axmedyassin C.raxmaan Axmed (Dool)** oo ah macalinka ugu mudada dheer ee wax i barayey si mug lehna iiga garab siiyey iguna dhiirigeliyey soo saarista buuggan.

Qadarin iyo ixtiraam weyn baan u hayaa dhamaan dhalinyarada igala qayb qaadatay dhameystirka buuggan gaar ahaan; **Sharmaake Axmed Carab, Ustaad Cadnaan Yuusuf Ibraahim** iyo cid kasta oo si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay soo saarista buuggan.

Hordhac

Waxa aan mugdi inaga saarneyn in noloshan adduunku leedahay iftiin iyo badhaadhe uu qofku gaadho, sidoo kale waxa aan iyana meesha ka maqnayn taas ka soo horjeedkeeda oo noqonaysa in noloshu leedahay mugdi iyo madow uu qofku dhex hawaarsado. Ogow oo labaduba waa midhaha kasoo go'a waxa uu qofku wakhtigiisa galiyo iyo ficilka uu la yimaado.

Haddaba, buuggan Talooyin iyo Tilmaamo wuxuu kaa caawinayaa sidii aad ku heli lahayd nolol iftiin iyo ilays leh, nolol horumar iyo hore-usocod leh, nolol sareedo iyo suubbanaan leh, nolol tanaad iyo tisaqad leh.

Buuggani wuxuu ka kooban yahay mawduucyo dhowr ah oo dhamaantood si toos ah u tilmaamaya talaabooyinka lagu helo nolol qurux badan oo badhaadhe badan. Waa mawduucyo ku dhaqankoodu keenayo nolosha wanaagsan ee adduunka iyo raaxada aakhiro. Dhab ahaan, haddii lala yimaado qodobada lidka ku ah kuwaa uu ka waramayo buuggani waxa hubaal ah in noloshu mugdi galayso. Sidoo kale, waxa ka qayb ah mowduuc wacyi-gelin ah oo ka dhan ah balwadaha gaar ahaan Qaadka ee ragaadiyey

dadka iyo dalkaba dhaqaale ahaan, dhaqan ahaan iyo horu-mar ahaan.

Ugu danbeyn, mawduucyada uu ka hadlayo buuggan Talooyin iyo Tilmaamo, waxa tixraac u ah kitaabka quraanka kariimka ah iyo axaadiista nebiga (N.N.K.H). Waxa aan iyana meesha ka maqnayn qaybaha kala duwan ee suuggaanta afkeena hooyo ee soomaaliga.

Afeef

“Aqalkaaga hortii ood baa la dhigtaa, hadalkaaga hortiina afeef baa la dhigtaa” aniga oo daliishanaya maahmaahdan kor ku xusan ee dulucdeeda ujeedo xeesha dheer tahay, waxa aan ka afeefanayaa dhamaan wixii khaladaada ee ku jira buugga hadday noqoto khalad dhankayga ah ama dhanka hab qoraalka ah.

Walow buugga dhowr jeer dib loo akhriyey soo dayntiisa ka hor, haddana waxa laga yaabaa in ay weli ku hadheen khaladaad dhanka dhisme afeedka ah ama dhanka ereyada iyo qaab qoraaleedka ah. Sidoo kale waxa aan ka afeefanayaa wixii ereyo ilduuf ah ee ku jira buugga.

Ugu danbeyn waxa aan soo dhaweynayaa dhamaan soo jeedimihiina ku aaddan buuggan si aan wax uga badalo una hormariyo daabacaadaha xiga.

E-mail: Rooble0155@gmail.com

whatsApp Number: +252 67 2203655

Alla mahad leh

1. Gabboodka aan gal daloolka lahayn.

Alle ka cabsigu waa gabood aan gal dalool lahayn haba yaraatee, maxaa yeeley Alle ayaa ah maamulaha iyo mulkiilaha adduunka iyo aakhiraba. Marka aynu ka hadlayno Alle ka cabsiga waxa aynu daliil u soo qaadan karna aayado badan oo ku suntan quraanka kariimka ah oo si cad u amaanaya kaalinta wacan ee Alle ka cabsigu leeyahay; aayadahaa waxa ka mid ah:

“Dadkii Alle rumeeyoow illahay ka cabsada oo waxa aad tidhaandaan hadal toosan*wuxuu illaahay idiin hagaajin doonaa camaladiina gafafkiinana (danbiyadiinana) wuu idinka tirtiri doonaa cidda alle iyo rasuulka aqbasha kaasi waa liibaanay liibaan weyn”

Sidoo kale waxa jira axaadiista rasuulkeena suubban oo iyana aad u tiro badan, kuwaas oo tilmaamaya wanaaga Alle ka cabsiga.

Waxa dhab ah in Alle ka cabsigu yahay furaha guul kasta. Sidoo kale waa fududeeyaha jaranjaradda dheer ee loogu jiro guusha waarta. *Oo sidaanu Alle ka cabsigu u keenin guul isaga oo Illahay maamulo adduunka iyo aakhiraba?*

“Alle ka cabsigu waa in laga baqo oo laga dhowrsado Eebbe weyne, in la sameeyo wuxuu Alle ina faray kana dheeraana wixii laynaga

reebay, laguna qanco wixii aynu hayno haba yaraadee, loona diyaar garoobo maalinta aynu geediga u nahay ee aakhiro”. Qeexitaankan xeesha iyo xikmadaba badan waxa laga dhaxlay Cali binu Abii Daalib (RC) oo ah khaliifkii afaraad (4aad) ee ummada muslimiinta.

Hubaal ahaan, Alle ka cabsiga waxa soo hoos galaya dhamaan wanaagyada iyo samafalka kala duwan. Haddii uu qofku yeesho Alle ka cabsi waxa uu galaa nolol macaan oo raaxo leh. Waxa uu ku sugnaadaa xasilooni iyo degganaanshiyo qalbiyeed.

In kasta oo ayna yarayn qisooyinka tilmaamaya wanaaga iyo dheefta Alle ka cabsigu leeyahay, haddana waxa aynu soo qaadan doonaa hal qiso. Waxa ayna ku bilaabanaysaa:

“Nebigu waxa uu ka waramay saddex nin oo god galay. Ka dibna waxa ku soo dhacay dhagax weyn oo ku daboolmay afkii godka ee ay ka bixi lahaayeen. Waxa ay isku af-garteen in nin walba uu Alle ku baryo camal uu dartii u sameeyey maadaama oo ayna ka bixi karayn meesha. Mid waxa uu ku Alle baryey in uu lahaa laba waalid oo da’ ahaa kuwaas oo uu usoo lisi jirey caanaha. Habeen ka mid ah habeenada ayaa ay ka hor seexdeen, ka dib markii uu arkay ayaa uu la dul istaagay ilaa uu waagii baryey oo ay kasoo

toosayeen hurdadii. Dhagaxii ayaa inyar ka dhaqaaqey.

Mid kale ayaa ku Alle baryey inuu lahaa nin u shaqaale ah. Ninkii shaqaalaha u ahaa ayaa kaga tagey amaano xoolo ah. Kadibna ninkii lagaga tagey waa uu u ilaaliyey amaanadii oo waa uu u xafiday una kobciyey. Beri danbe ayaa uu ninkii xoolaha amaanada ah lahaa u yimid ninkii uu kaga tagey; waxa aanu weydiistay amaanadii. Ninkii amaanada ilaaliyeyna waxa uu u tilmaamay xoolo badan oo uu ku yidhi kaxayso adiga ayaa leh. Haddana dhagaxii waa uu dhaqaaqay laakin kama bixi karaa.

Kii saddexaadna waxa uu ku Alle baryey inuu ay jirtay gabadh ay qaraabo ahaayeen, gabadhii waxa ku dhacday baahi daran. Waxa ay u timi ninkii ay qaraabada ahaayeen. Waxa ay weydiisatay inuu caawiyo. Ninkii waxa uu ku xidhay shardi ah in ay ogolaato xumaan uu ku sameeyo. Waa ay diiday iyada oo Alle ka cabsanaysa. Ka dibna waa uu diiday inuu caawiyo. Muddo ka dib ayaa ay baahidii kusii badatay gabadhii. Mar labaad ayaa ay kusoo noqotay iyada oo ka dalbanaysa caawin; isaguna shardigiisu waa halkii. Markan xaaladu wey ku adagtahay gabadha, waa ay aqbashay. Ka dib,

markuu damcay inuu xumaantii sameeyo ayey ku tidhi “*waar Alle ka cabso oo xubinka xaaraan haku sameyn*”. Markuu maqlay hadalkaa, ayaa uu dib isku taagay oo uu ka noqday wuxuu doonayey. Gabadhiina waa uu siiyey waxa ay doonaysay. Ugu danbeyn, dhagaxii waa uu ka faydmay dhamaantoodna waa ay kasoo baxeen.”

Inyar oo ka mid ah dhaxalka ma guuraanka ah ee laga helo Alle ka cabsiga oo lala yimaado waxa ka mid ah:

- 1. Waxa lagu helaa jannada Eebbe iyo jacaylkiisa.*
- 2. Waxa lagu helaa kaalmaynta iyo taakulaynta Eebbe.*
- 3. Waxa loo fududeeyaa qofka dhamaan howlaha adduun.*
- 4. Waxa lagu helaa toosnaanta iyo in la fahmo cilmiga.*
- 5. Waxa lagu helaa danbi dhaaf.*
- 6. Waxa lagu helaa in lagaa faydo kurbada.*
- 7. Waxa laga quudinayaa (arsaaqay) meel aanu ka filayn.*
- 8. Waxa lagu helaa degenaanshiyo qalbiyeed.*
- 9. Waxa lagu helaa in lagaa badbaadiyo cadaabta.*
- 10. Waxa aad helaysa cibaadada oo kuu fududaata.*

2. Baraha Nolosha

Miyaanay sabab u ahayn inaynu adduunka nimaadno? Miyaanay jannadu cagaheeda hoosteeda ahayn? Miyaanay ahayn iftiinka nolosha? Miyaanay ahayn barraha iyo barbaariyaha dhalaanka? Miyaanay la'aanteed noloshu mugdi ahayd?

Dabcan haa, way tahay.

Hooyadu waa iftiinka iyo illayska nolosha. Waa dheefta iyo dhuuniga hunguriga mara. Waa isha badhaadhaha iyo barkhada adduun iyo aakhiraba. Waa hagaha iyo hogaamiyaha ubadka. Waa shaqaale aan lacag lagu siin barbaarinta dhalaankeeda. Waa tobabare nololeed, la'aanteedna horumar iyo hanaqaad midna aanu jirin. Waa hayinka reerka iyo laf dhabarta qoyska. Waa hogol lagu qaboobo waana barta qofka dhaqankiisu ka soo farcamo. Waa goobta noloshu ka bilaabanto. Waa qofka ugu xaqa mudan aadamaha. Taasna waxa daliil u ah;

“Aadamaha waxa aanu u dardaraanay inuu u samafalo labadiisii waalid, hooyadiibaa qaaday culays mid kale weheliyo ka gudhinta naaskuna waa laba sano, aniga ii mahadnaq iyo labada ku dhalay. Xagaygey ahaatay halka loo soo noqon”

Barbaarinta iyo carbinta caruurto maaha mid jaamacaddo iyo dugsiyo looga soo baxo balse waa hibo Eebbe ugu deeqay hooyooyinka. Waxa ay barbaariyaan ubadkooda iyaga oo u dulqaata dhib kasta oo kaga timaada dhalaankooda. Hooyaddu waxa ay hagtaa caruurteeda, iyada oo barta hab dhaqanka wacan iyo asluubta suubban.

Hooyadu waa iftiinka iyo ilayska nolosha sababta oo ah iyada la'aanteed noloshu waa mugdi madow badan. Waxa ay horeysiisaa oo ay horumarisaa baahida ubadkeeda, iyada oo u huraysa wax kasta oo ay u baahan yihiin. Waxa ay soo saartaa ubad aayatiin leh oo anfaca bulshada ay ka tirsan yihiin. Waxa ay soo saarta dhallaan aragti iyo karti nololeed leh. Waxa ay kobcisaa maanka iyo maskaxda caruurteeda.

Hooyadu waa hoyga dulqaadka iyo samirka, maxaa yeelay waxa ay u adkaysi leedahay dhamaan dhibaatooyinka kaga yimaada xilliga korinta dhalaankeeda. Hooyadu ma hiifto mana hagardaamayso ubadkeeda balse waxa ay u horseeda hogaamin la mahadiyo timaadada.

Cilmi baadhis la sameeyey ayaa lagu cadeeyey in ilmaha ay hooyadu soo koriso ee jaqa caanaha

naaskeedu inuu ka naxariis badan yahay ilmaha aan nasiibka u helin korinta iyo kaalin galinta hooyada. Sidoo kale, waxa la cadeeyey in caanaha naaska hooyada laga jaqaa ay u horseedaan ilamaha inuu fahamkiisu wacnaado weliba uu ku wacnaado waxbarashada. In la naasnuujiyo caruurtana waxaaba ina faraysa diinteena Islaamka.

Kaalin galka ilmaha waxa hormood u ah hooyada dhashay oo u hurta naf iyo maalba si uu u dhiso mustaqbalkiisa. Hooyadu waxay la damqataa dhib kasta oo ku timaada ilmaheeda in ka badan inta uu aabbuhu la damqado, sababtaas ayey badanaa dhalinyarada tahriibtaa ugu soo gargaar dalabtaa hooyooyinkood. Haddaba si aynu u cadeyno in hooyadu ka damqasho badan tahay aabaha waxaynu badh ka soo qaadan maansada caanka ah ee ay tirisay **Maamo Koos Jaamac Dhunkaal** oo si cad u qeexaysa naxariista hooyada, maansaduna waxay ku bilaabanaysaa:

- ✓ *Waa lagu haleeyee hooyo*
- ✓ *Waa lagu hagradae hooyo*
- ✓ *Waan laguu hadlayne hooyo*
- ✓ *Hanfi kuma haleeleen hooyo*
- ✓ *Haadu kuma daldalateen hooyo*
- ✓ *Ma hadh galo habeenkii hooyo*

- ✓ *Dharaartii ma haybsadee hooyo*
- ✓ *Hurdo seexan waayey hooyo*
- ✓ *Ana howdka ha I galin hooyo*
- ✓ *Adna haada ha u tagin hooyo*

Sidoo kale, waxa jira maansooyin fara badan oo ka hadlaya kaalinta hooyadu ugu jirto aadamaha dhamaantii. Maansooyinkan qiimaha badani waxa ay kasoo maaxdaan maskaxda abwaanada soomaaliyeed. Balse hadaynu soo qaadanayo heesta ugu caansan dhanka heesaha laga tiriyey kaalinta hooyada, waxa aynu soo qaadan heesta uu curiyey Alle naxariistii jano hawgu deeqee **Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi)** ee tidhaahda:

Hooyooy la'aantaa	Aduunyadu hubaashii
Habeen kama baxdeenoo	Iftin lama heleenoo
Dadku uma hayaameen	Xiddig hawd ka lulatoo
Sida haad ma fuuleen	Dayax heego joogoo
Hubka laguma tureen	Hawo laguma gaadheen
Cirka hirar ka muuqdoo	Hooyoy addoomuhu
Halkay maanta joogaan	Adigow horseedoo
Intaad hanad xambaartee	Haaneedka siisee

Horaaddada jaqsiisee	Habtay baan xisaab iyo
Tiro lagu heleynoo.	Marka aad nin hiiloo
Laga baqo hashiisiyo	Halyey diran dhasha baa
Hooyo lagu xasuustaa.	
Marka aad nin hoo-loo	Gurigiisa habaqluhu
Isku soo halleeyoo	Hayntiisa quudhoo
Hor Illaahay geystiyo	Lama hure dhashaa baa
Hooyo lagu xasuustaa.	

Ugu danbeyn, waxa markhaati ma doona in qofka inkira ee isdiidsiiya xaqa iyo xuquuqda hooyada uu dhaxlo nolol rafaad iyo dhibaato hoygeedu yahay. Waxa uu la kulmaa cidhiidhiga adduunka iyo cadaabka aakhiro. Kuma dheefo nolosha adduun ee loo socdo hadh iyo habeen. Kuma nagaado guri nasasho leh balse wuxuu la hoydaa mugdi iyo murugo aan dhamaad aqoon. Waxa uu galaa qoomamo aan waxba qabanayn. Wuxuu dhammaa dhitadii qadhaaadheyd ee uu hore usii dhigtay.

Talooyin iyo tilmaamo

1. *Ixtiraamka iyo qadarinta waalidku waa amar Alle ina saaray.*
2. *U-sama-falka waalidku waa waajib qofka saaran.*
3. *Raali ahaanshaha waalidka gaar ahaan hooyadu waa furaha nolol qurux badan oo lagu badhaadho.*
4. *Xaqa Alle waxa ku xiga xaqa labada waalid gaar ahaana hooyada.*

3. Aqoon la'aani, waa iftiin la'aan

Suuraddee ayay ahayd suuraddii ugu horeysay ee Rabbi (S.W) ku soo dejiyey Rasuulkeeni suubbana ee Muxamed(N.N.K.H)? Ma siman yihiin aqoonyahanka iyo aqoon laawuhu? Ma cibaadaysan kartaa cilmi la'aan?

Hubaal, aqoonta rasmiga ahi, waa aqoonta loo yeesho Eebbe iyo diintiisa balse aqoonta ku salaysan horumarka adduunka waxa laga soo unug dheegay aqoonta sharciga Islaamka. Sidoo kale, aqoontu waa shayga kaliya ee qofka u sababa harumar iyo hore usocod adduun iyo aakhiraba. Taasna waxa daliil kuugu filan qowlka Eebbe ee ku xardhan in badan oo ka mid ah Quranka kariimka ah, tusaale ahaan:

“Akhri adigoo ku bilaabaya magaca rabbigaa ee abuuray khalqiga oo dhan”

Taa dhigeeda nebi Muxamed waxa uu inagu dhiiri geliyey cilmiga barashadiisa. Waxa aanu yidhi, *“Qofka mara wado uu ku doonayo cilmi, Alle wuxuu u sahlaa wadooyinka jannada”* .

Cilmigu waxa uu leeyahay sumcad iyo sharaf u gaara qofka wax bartay. Qofka caalimka ah waxa kasoo horjeeda qofka umiga ah (jaahil), waxaana u dhaxeeya farqi aad u weyn. Caalimku waa qof aragti

dheer leh. Sidoo kalena waa qof ka dabaalan kara dhibaatooyinka is barkan ee nolosha beerkeeda ka buuxa.

Si kastaba ha ahaatee, aqoonta weynu u baahanahay meelkasta iyo markasta maxaa yeeley aqoon la'aani waa iftiin la'aan. *Sideynu uga maarsanaa aqoonta maadama oo ay tahay saldhiga laga unko dhamaan qaybaha hore-u-socodka nololeed?* Horumarka dhinacyada kala duwan ee nolosha waxa ay si toosa ugu qumaan ama ugu hagaagaan marka qabashadooda lagu ladho aqoon iyo howlkarnimo hufan. Taasna waxa cadeyn u ah Heesta uu tiriyey, abwaan **Saciid Saalax Axmed** ee la yidhaahdo **Amba qaad** oo ka hadlaysa in howl qabshadeedu u baahan tahay aqoon.

- *Amba qaadka geediga*
- *Sida awrta loo raro*
- *Heesaha u gaarka ah*
- *Waxa lagu aloosaa*
- *Magac Eebbeheen iyo*
- *Adin iyo af wada jira*

Dheefta ay aqoontu u leedahay qofka aadamaha ah, maaha mid tiro iyo erey toona lagu soo koobi karo; habase ahaatee waxa aynu xusi doonaa dhowr qodob

oo kamid ah dheefta iyo dheeraadka aqoontu leedahay. Tusaale ahaan:

1. Aqoontu waxa ay sababtaa in aad si dhaba u caabudo Eebbe.
2. Waxa ay keentaa horumar qofnimo iyo qaranimo intaba.
3. Waxa ay hoy u tahay aragti dheeri toolmoon.
4. Waxa ay keentaa sumcad iyo sharaf aan aqoonta dhigeedu haybsan.
5. Waxa ay si fudud u xalisaa khilaafaadka bulshada.
6. Waxa ay kobcisaa maanka iyo maskaxda qofka.
7. Waxa ay keentaa hogaan toolmoon.
8. Waa iftiin iyo ilays lagu iftiinsado nolosha.
9. Waa haro aan gudhin gu' iyo jiilaal. Macnaheeduna tahay in aqoontu kula soconayso meelkasta iyo markasta maxaa yeelay waxa ay ku jirtaa maskaxda qofka mana ka hadhayso. Taa waxa dheer, xitaa haddii qofka hayntu ka fara baxdo, aqoontu ma baxayso.
10. Waxa ay kala horeysiisaa dadka.
11. Waa shayga kaliya ee Nebigeenii udgoonaa la amray in uu Illahay baryo in loo siyaadiyo.

12. Waa shayga keena in wadamada caalamku isku awood sheegtaan.
13. Waa furaha horumarka wadan iyo wadar bulsheedba.
14. Waxa ay sameysaa hanti weyn wakhti kooban.
15. Waxa ay siyaadisaa Alle ka cabsiga.

Aqoonta waxa ay kasoo burqataa oo laga soo qaataa Bare(macalin). Macalin la'aantiina lama heleen hoobanta hunguri marka leh ee aqoonta. Sidaas oo ay tahay, waxa inoo muhiima in la qadariyo lana maamuuso macalinka sababta oo ah waa isha aan gudhin ee aqoonta. In la ixtiraamo oo la sharfo macalinka waxa laga dhaxlaa in la helo aqoon iyo cilmi hufan oo la haadiyey. Haddaba waxa aynu soo qaadan doonaa gabay uu tiriyeey Alle haw naxariistee **X. Aadan Axmed (Af-qalooc)** oo ka hadlaya kaalinta macalinka iyo waxa looga baahanyahay bartaha (ardayga).

- *Oday waayo aragaan ahoo, ayni weyn jiraye*
- *Markaad ood-ka-bood tahay tashigu, waa in kaa maqane*
- *Wixii danna abwaanna gartee, inammo waa mooge*
- *Inaan anigu idin waaniyaa waa, amuur xaqa'e*

- *Ardayahay aqoonsada cilmiga, aafu waa jahale*
- *Ijtahaada idinkaa kor u kici, aradka soomaale*
- *Akhlaaqxumo iska ogaada, waad ku anbanaysaane*
- *Ma aflaxo ilamaha caasiyee, edebta diidaaye*
- *Haddii aanad akrimin macallimiintu, kuuma uur-sama'e*
- *Waa niman amaan loo xumaha, laga ilashaaye*
- *Ixtiraam la'aan lagama helo, aayo iyo khayre*
- *Waa kuu ilays meel mugdiya, aad ku aragtaaye*
- *Waa kuu afkaad ku hadaashiyo, odhaahda liisaane*
- *Waa ubaxa kii korinayee, aaminka ahaaye*
- *Waa amalka noloshaa danbeed, ku istareexdaaye.....*

1. *In cilmiga loo baranayo Alle dartii oo uu rabo in uu ku anfaco naftiisa, qoyskiisa, qarankiisa iyo umada Islaamka.*
2. *In dadaalku gundhig u yahay aqoonta iyo cilmiga.*
3. *In lala yimaado Samir iyo adkaysi uu u yeesho dhibta wadada aqoonta.*
4. *In aqoonta laga yeesho hadaf iyo yool uu hiigsado.*
5. *In lala yimaado akhlaaq wanaagsan iyo asluub wacan.*
6. *In aad loo qadariyo macalinka oo la garto qiimihiisa.*
7. *In aan la joojin barashada aqoonta kala duwan.*

4. Awoodda dahsoon

Illaahay awoodihiisa ayaa uu ugu deeqaa cidii uu doono, caynkasta oo ay tahay iyo cadad kasta oo ay tahayba. Awoodda jidheed waa muhiim balse waxa ka muhiimsan awoodda shakhsiyadeed ee qofka qalbigiisa ku jirta.

Kalsoonidu waa illinka laga galo guusha. Walow kalsoonida lagu qeexo ereyo iyo tibaaxo badan balse si kooban waxaynu ugu tilmaami karnaa in ay tahay *“Awood dahsoon oo qofka qalbigiisa ku jirta, una suurta galisa inuu soo bandhigo wuxuu hibanaayo”*. Si kastaba ha ahaatee, kalsoonidu waa shayga fududeeya howlaha adduun ee weji gabaxa badan, maxaa yeeley kalsoonidu waxa ay wadada u furtaa hanka iyo himilada qofka. Intaas waxa dheer in kalsoonidu tahay awoodda uu qofku ku cabiri karo dareenkiisa dhabta ah ee ku aadan mawqaca taagan.

In kasta oo cid kastaaba jeceshay inay hesho kalsooni, haddana taa dhigeeda waxa hesho kalsoonida in yar oo u howl-gasha helideeda. Nolol maalmeedkeena joogtada ah waxa aynu kala kulanaa dad badan oo ka habranaya in ay wajahaan caqabadaha nolosha ee kala gedisan; taasna waxa aynu ku tilmaami karnaa kalsooni daro. Xaqiiqdu waxa ay tahay in qofkastaa uu jeclaan lahaa inuu helo

kalsooni buuxda oo uu ku qabo naftiisa, go'aankiisa, maankiisa iyo weliba awooddiisa qofeed.

Si kastaba ha ahaatee, waxa jira qodobbo fududeyn kara helitaanka kalsoonida. Waxa aynu ka soo qaadan karnaa:

1. Xidhiidhka Alle oo uu qofku hagaajiyo.

Waxa aynu rumaysanahay in adduunkan aynu ku guud noolnahay uu maamulo Alle (S.W) kana arrimiyo wax kasta oo ka dhacaya iyo si kasta oo ay u dhacayaanba. Sidaas darteed waxa hubaal ah qofka ku xidhma Alle (S.W) inuu siinayo kalsooni buuxda. Sidoo kale inuu qalbigiisa ka buuxin doono hodantinimo. Markaa waa in aynu badinaa ducada iyo salaada si aynu u gaadhno kalsooni nafeed.

2. In qofku yeesho dhiiranaan.

Waxa hubaal ah in wax kastaaba ku socdaan qadarka Alle, sidaas oo ay tahayna, waxa muhiim ah in aynu ku dhiirano wax kasta oo aynnu qabanayno maxa yeeley waxa ay noqonayaa laba midkood; waa ta hore'e waa in ay arrintaasi u dhacdo sida aynu rabno, waa ta xigtee waa in ay arrintaasi u dhaco sidaynu rabno si aan ahayn.

Hadaba haddii ay arrintaynu rabnaa inoo hagaagto waa sideynu rabnay, waxa aynanu ka korodhsanaynaa kalsooni iyo dhiiranaan. Haddii kale oo ay inoo suurta geli weydana waxa aynu ka baranaynaa cashar waxa aynanu ka korodhsanaynaa khibrad.

3. In qofku sameeyo isku dayo fara badan.

Xigmad carbeed ayaa tidhaahda “**كلما تكرر تقرر**” oo macnaheedu noqonayo wixii lagu celceliyaa way sugmaan. Sidaas darteed, waxa inoo muhiim ah in aynnu sameyno isku dayo badan si loo gaadho hadafka uu qofku leeyahay.

4. In qofku lahaado is-aaminsanaan togan.

Tani waa talaabo aad muhiim ugu ah qof kasta oo raba in uu meel gaadho. In uu qofku iska aaminsanaado fikir iyo aragti togan waxa ay fududeysaa hayaanka geediga dheer ee uu qofku ugu jiro xaqiijinta hadafkiisa. Haddaba waxa inagu waajiba in aynnu hagaajino aragtida aynnu ka haysano nafaheena. Sidoo kale waxa muhiim ah in aynnu iska ilaalino afkaarta dib u dhaca iyo curyaaminta hanka qofka sababta.

5. In qofku yeesho go'aan adag.

Qaadashada go'aan fiicani maaha arin si sahal ah ku timaada balse waa arrin loo galo dadaal iyo fikir xeel dheer oo qaata wakhti badan. Haddaba qaadashada go'aan fiicani waxa ay si fiican u dhistaa kalsoonida nafta maxaa yeeley qofku haddii uu go'aanadiisa ku meel maro haba-yaraadaane wuxuu helayaa awood ku filan oo kalsooni ah umana baahanayo cid ka caawisa dhibaatooyinka is huwan ee noloshu soo bandhigto.

Ugu danbeyn, waxa aan ku kalsoonahay qofka raaca talaabooyinkan iyo kuwa la mid ah in uu si fudud ku heli karo kalsoonida nafta. Ogowna waxna dhib yaraan kuma yimaadaan. Sidaas darteed, u dhabar adayg dhib kasta iyo cidhiidhi kasta oo kaa soo wajaha helida waxa aad rabto ee ah kalsooni buuxda in aad naftaada ku qabtid.

1. *Si aad kalsooni u heshid waa in aad raacdaa talaabooyinka sare.*
2. *Isku day in aad saxdo aragtida aad ka haysato naftaada maada oo ay sar goynayso hadba sida uu fikirkaagu noqonayo.*
3. *Ku dhiiro shaqo kasta oo aad qabanayso oo Alle talo saaro si ay kuugu noqoto mid midho dhal leh.*
4. *Dulqaad u lahow wax kasta oo aad qabanayso maadama oo ay ka hor imanayaan caqabado badani.*

5. Xadhiga nolosha

Nolosha adduunka ee aynu nool nahay waa nolol cinwaankeedu yahay imtixaan, cutubyada ay ka kooban tahayna waa dhib iyo dheef is barbaryaal. Waa xaqiiq in qof walbaba uu helo inta uu dadaalo ee uu u samro waxa uu doonayo.

Haddaba samirku waa deeq uu Illahay uu siiyo cida addoomihiisa wanwanaagsan ka mid ah ee uu doono. Samirku waa xadhig adag oo lagu gaadho meel dheer. Sidoo kale, samirku waa buundada lagaga gubdo dhibaatooyinka nolosha. Si kastaba ha ahaatee, samirka iyo muhiimadiisa waxa ay ku cad yihiin kitaabka Quraanka kariimka ah iyo sunaha Nebigeena suubban (N.N.K.H), tusaale ahaan:

Alle (sw) waxa uu ku yidhi Quraanka kariimka ah
“Alle waa uu jecel yahay kuwa samra”

Haddii aanu qofku u dhabar adaygin dhibaataayinka nolosha, haddii aanu u samrin cidhiidhiyada, haddii aanu u dulqaadan hagardaamooyinka xidhiidhka ah ee nolosha, haddii aanu u adkaysan qadhaadhka guul darada iyo isku daygu leeyihiin, Miyuu gaadhayaa meeshuu gaar u rabay?????????

{Nimaan shaqaysani, shaah ma cabbo}, waa maahmaah soomaaliyeed ah oo dulucdeeda ujeedo ay aad u gudo balaadhan tahay, balse hadaynu si kooban u tilmaamno waxa ayna noqonaysaa in uu qofku u dadaalo una sabro wuxuu rabo.

Waxa hubaal ah, in nafta aadamuhu jeceshahay waxa fudud ee dhibta yar leh misana dheefta badan. Doonitaankan aan caddaalada ku dhisnayn wuxuu hordhac u yahay dib u dhaca balaadhan ee qofnimo, qoysnimo iyo weliba qaranimo, maxaa yeeley haddii aynu dhamaanteen wada sugno wax yar oo si fudud u dhaca waxa hubanti ah in aynu guuldaraysanayno.

Samirku in uu yahay sabab ka mid ah sababaha keena guusha, waxa cadeyn u ah in guulaystayaashu ka siman yihiin u samrida iyo u dhabar adayga howlohooda nololeed iyo u dulqaadashada dhibaatooyinka ka horyimaada inta ay ku gudo jiraan xaqiijinta han iyo himilo ay leeyihiin.

Dhab ahaan, haddaynu soo qaadano tusaale ku haboon mawduuceena oo si toosa u tilmaamaya in samirku yahay lama huraan. Waxa tusaale inoogu filan nebi Muxamed (N.N.K.H). Nebi Muxamed (N.N.K.H) waxa uu Alle soo diray isaga oo keli ah oo aan wadan wax ciidan iyo cudud milatari ah. Goorta

la soo diray waxa ay ahayd goor uu dulmigu hantiyey dhulkii iyo dadkii deggenaa jaziiratul carab. Waxa la soo diray isaga oo aan wadan dhaqaale badan oo uu ku hirgeliyo dacwada iyo diinta Alle. Nebigeenu markii ay ku soo degtay aayaddii ugu horeysay ee Quraanka kariimka ahi, ayaa uu bilaabay in uu u xadhko xidho sidii uu diinta Alle u sareyn lahayd. Ka dib, waxa uu u samray in uu u dulqaato dhamaan dhibaatooyinkii kale duwanaa ee kaga imanayey ehelkiisii uu la noolaa ee reer Maka. Waxa uu u samray 23 sanadood oo uu halgan joogto ah ugu jiray sidii ay u hana-qaadi lahayd diinta Islaamku. Nebi Muxamed waxa uu u samray dhamaan duruufihii kala gedisnaa ee soo maray hadday ahaato; gaajo, harraad, jihaad, iwm. Dedaalkii iyo samirkii dheeraa ee uu Nebi Muxamed (N.N.K.H) ugu jiray diinta Islaamka, waxa uu Alle sabab uga dhigay in ay hirgasho diinteena suuban oo ay weliba ku faafto dhamaan daafaha caalamka.

Sidoo kale, dhamaan dadka gaadhay ama xaqiijiyey han iyo himilo ay lahaayeen waxa soo martay maalmo iyo wakhtiyo aad u qadhaadhaa oo ay kaga soo gudbeen samir iyo dhabar adayg. Waxa aad arkaysaa marka aad akhrido sheekooyinka iyo qisooyinka dadkii guuleystay, in samirku yahay udub

dhexaadka guusha; sababta oo ah wax kasta oo la rabo in la gaadho waxa uu u baahan yahay in wakhti la siiyo oo lagu dadaalo isla markaana loo samro dhib kasta oo kaaga timaada gaadhida meesha aad doonaysid.

Si kastaba ha ahaatee, waxa jira qodobo kuu fududeyn kara helitaanka in aad ku naalooto Samir midho dhal ah. Waxa ka mid ah qodobadaas:

1. In aad u fiirfiirsato oo aad dhugato aayadaha quraanka kariimka ah iyo axaadiista nebigeenii suubbanaa (N.N.K.H) ee ka waramaya muhiimada samirka iyo dheeftiisa.
2. In si fiican loogu dadaalo in la fahmo lagana faa'ideysto qisooyinkii nebiyada iyo dadkii hore wanaagsanaa.
3. In qofku dib u raadraaco sooyaalkii nololeed ee asaxaabtii iyo rasuulkeeni Muxamed (N.N.K.H).

Ugu danbeyn, waxa aynnu hubnaa, in wax kasta oo la sameeyaa uu yeesho abaal-marin togan ama mid taban. Waxa taa dhigeeda ah in haddii uu qofku ku dadaalo samirka in uu helayo abaal-marin fiican sida:

1. Helitaanka jacaylka Illahay oo aynnu u jeelanahay goor kasta.

2. In uu qofku ku guulaysto janada Eebbe ee aynu u socono hadh iyo habeen, sidoo kalena ka badbaadno cadaabta iyo ciqaabta xanuunka badan ee Rabbi (S.W).
3. In uu gaadho qofku hadafyadiisa nolosha.
4. In uu noqdo qof khibrad iyo aqoon dheerada u leh nolosha.

Talooyin iyo tilmaamo

1. *Ku samir wax kasta oo ku soo mara nolosha adiga oo ajar iyo khayr rajaynaya.*
2. *Ogow in samirka dheef mooyaane aanu dhibi ka dambayn.*
3. *Ku xisaabtan in samirku uu yahay sifada dadka guulaysta.*
4. *Ogow samirka waxa looga baahan yahay meel kasta oo nolosheena ka mid ah sida in aad ku samirto cibaadada, in aad ka samirto macsida iyo in aad ku samirto imtixaanada xanuunka badan ee nolosha.*
5. *Ogow samirka waxa uu leeyahay faa'idooyin aan tiro lagu soo koobi karayn.*

6. Da'da dahabiga ah

Wakhtigee ugu mudan cimriga qofka? Goormuu qofku ugu awood badan yahay jidh ahaan iyo maskax ahaanba? Waa da'dee da'da sameyn karta isbedel rasmiya? Da'dee baynu ku sheegi karnaa da'da dahabiga ah? Goormaa la tabcada waxtarka timaadada?

Da'da dhalinyarnimadu waa da'da ugu mudan cimriga qofka, sababta oo ah waa cimri iyo da'a u dhaxaysa laba liidasho. Dhalinyarnimadu waa cimriga ugu qaalisan ee qof aadama ihi haysto, maxa yeeley waa wakhti uu qofku sameyn karo isbedel qofnimo iyo qaranimo. Sababta ay da'da dhalinyarnimadu u noqotay cimri qaaliya waxa ay tahay, iyada oo uu Eebbe (S.W) uu ina weydiin doona maalinta qiyaame afar (4) su'aalood oonu qofna ka hor dhaqaaqeyn ilaa uu ka jawaabo, haddaba cimriga dhalinyarnimadu waa su'aal ka mid ah afartaa (4) su'aalood ee la is weydiin doono maalinta qimaaye.

Awoodda rasmiga ah ee bulsho ay leedahay waa awoodda dhalinyarteeda. Dhalinyaradu waxa ay bedeli karaan geedi u socodka bulshadooda iyaga oo u jihaynaya tubta hore-usocodka iyo horumarka. Waxa ay had iyo jeer jaangooyaan jiho u socodka bulshadooda. Waxa ay horseedaan badhaadhe umadeed iyo barkhad bulsheed. Waxa ay horkacaan

isbedelo joogto ah oo la mahadiyo mustaqbalka. Waxa ay leeyihiin awood ka badan ta ku jirta dhalaanka iyo ciroolaba. Waa marka ay dhalinyaradu tahay; kuwo han iyo himilo leh, dadaal iyo daacadnimo leh, hal-adayg iyo howl-karnimo leh, diin iyo deeqsinimo leh.

Awoodaha gaar ahaaneed ee dhalinyartu ku naalooto kuna keento isbedel balaadhan oo badhaadhe keena waxa ugu mudan;

1. Waxa ay leeyihiin ku dhac.

Qofka dhalinyarada ahi waxa uu leeyahay awood uu ugu dhaco wax kasta oo uu qaban karo. Tan macnaheedu waxa ay tahay in ay dhalinyaradu leeyihiin ku dhac iyo dhiiranaan shay kasta ah.

2. Waxa ay leeyihiin go'aan.

Inta badan dhalinyaradu waxa ay leeyihiin awood go'aan qaadasho, walow ay dadka waaweyni la wadaagaan awooda go'aan qaadasho haddana ta dhalinyaradu wey ka awood badantahay kana firfircoon tahay. Intaa waxa dheer in awoodooda go'aan qaadasho ay tahay mid wax weyn ka badali karta mustaqbalka umadooda.

3. Waxa ay leeyihiin maskax fayow oo firfircoon.

Dhalinyartu waxa ay leeyihiin maskax ka madhan mashquulka bulsheed ama qoysnimo sababta oo ah ma hayo xilal bulsheed, iwm.

4. Waxa ay heystaan wakhti badan oo firaaqo ah.

Dhalinyaradu inta badan iyagaa leh wakhtigooda maxaa yeeley ma jiraan masuuliyado badan oo korkiisa saran. Qofkuna haddii uu weynaado waxa bata xidhiidhadiisa uu la leeyahay bulshada.

Ugu danbeyn, maadama oo aynnu soo aragnay in wakhtigu yahay ma door soomo aan istaagayn gaar ahaana uu ugu sii muhiimsan yahay wakhtiga dhalinyarannimadu, waxa aynnu soo qaadan doona sida ugu haboon ee wakhtiga loo maareeyo loogana faa'idaysto. Haddaba talabooyinka la qaadayo marka la rabo in la maareeyo wakhtiga waxa ka mid ah:

1. Alle ku xidhnow
2. Dejiso hadaf aad rabto in aad xaqiijsi ama meel aad rabto in aad gaadho
3. U kala horeysii arrimahaagu sida ay u kala muhiimsan yihiin

- ✓ Kala horeysiinta howlaha aad rabto in aad qabataa waxa loo kala saaraa afar waaxood oo kala ah:

1. Kuwo muhiim ah degdegna ah

2. Kuwo muhiim ah balse aan degdeg ahayn

3. Kuwo aan muhiim ahayn balse degdeg ah

4. Kuwo aan muhiimna ahayn degdegna ahayn

4. Samayso jadwal maalmeed, mid usbuuca oo dhan ah, mid bille ah iyo mid sanadle ah.
5. Sameyso wakhti kama dambeys ah shaqo kasta.
6. Mar kasta sido buug yarahaaga (note book).
7. Howl kasta wakhtigeeda qabo, jooji dib u dhigista.
8. Samee is qiimeyn joogto ah.
9. Iska ilaali waxyaabaha wakhtiga dila.
10. Qor caadooyinkaaga liita ee wakhtiga badan kaa qaata ka dibna isku day in aad yareyso oo ayna wakhti badan kaa qaadan.

Haddaba haddii aynnu qorshayno wakhtigeena maxaa faa'iido aynnu helaynaa???????

Faa'idooyinka laga helo in uu qofku wakhtigiisa maamulaa maaha mid hal iyo laba lagu soo koobi karo, waxa ka mid ah:

1. Waxa aad mudo yar ku qaban kartaa howlo badan oo muhim ah
2. Waxa aad helaysaa wakhti firaaqo ah
3. Waxa aad si fudud u xaqiijin kartaa hankaaga
4. Waxa aad noqonaysaa qof kalsooni leh
5. Waxa badanaya wax soo-saarkaaga
6. Waxa aad noqonaysaa qof ku xisaabtama wakhtigiisa
7. Waxa aad noqonaysaa qof ay u cadahay meesha uu rabo in uu gaadhaa.

Talooyin iyo tilmaamo

1. *Wakhtigu waa hantida ma guurtada ah ee uu qof walba Alle siiyey waana ra'sumaalka qof walba.*
2. *Da'da dhalinyarnimadu waa wakhtiga ugu muhiimsan uguna qaalisan ee qofka soomara.*
3. *Kala horeysiinta hawluhu waxa ay keenaan horumar iyo hore usocod nololeed.*
4. *Wakhtigaaga oo dhan ku buuxi cibaadada Alle. Gaar ahaan wakhtiga dhalinyarnimada si aad uga mid noqoto kuwo uu Alle u hadhaynayo maalinta qiyaame.*
5. *Isku kalsoonow oo samee isku dayo badan oo nololeed.*

7. Hantida ma guurtada ah

In aad yeelato hab dhaqan iyo hannaan la mahadiyo waxa ay kaa dhigaysaa qof ay la jaanqaadi karto bulshada uu la dhaqan yahay iyo dadka uu ka farcanyahay. Akhlaaqda suubbani waa wado ka mid ah wadooyinka lagu helo iftiinka iyo ilayska nolosha qofka aadamaha ah. Markaan sidan leeyahay waxa aan gabood ka dhiganayaa xadiiska rasuulkeeni suubbanaa ee odhanayey; “*Ma jiro shay kaga culays badan miisaanka maalinta qiyaame akhlaaqda wanaagsan*”

Sidoo kale Alle weyne markuu amaanayey rasuulkiisa Muxamed (N.N.K.H) waxa uu ku amaanay akhlaaq wanaag. *Ma wax ka wanaagsan baad garan shay uu rabbi uu ku amaanay rasuulkiisa Muxamed (N.N.K.H)?*

Akhlaaqda suubban waxa ay door aad u amaanan ku leedahay diinteena Islaamka ee wanaagsan. Marka aynu sheegayno akhlaaqda iyo dabeecadda wanaagsan waa qodob aad u ballaadhan oo waxaana soo hoos galaya qodoba dhowr ah oo ka farcamaya akhlaaq wanaagsan. Waxa aynu soo qaadan karnaa kuwa ugu muhiimsan ee ka mid ka ah akhlaaqda wanaagsan sida:

1. Runta oo lagu dadaalo.
2. Amaanada oo la ilaaliyo.
3. Dhowrsanaanta.
4. Xishoodka.
5. Balan oofinta.
6. Karaamaynta iyo ixtiraamka dadka.
7. Caawinta dadka baahan intaad awoodo.
8. Ka fogaanshaha wixii Alle kaa reebay.
9. Cafiska iyo dulqaadka.

Maadaama oo ay cadhadu ka mid tahay dareenada uu rabbi inagu abuuray, haddana xakameynta cadhada iyo cafisku waa mid ka mid ah akhlaaqda wanaagsan. Qof ku xumeeyey in aad wanaajisaa waxa ay u baahan tahay in aad marka hore leedahay akhlaaq wacan iyo edaab dhowrsan; sababta oo ah akhlaaqda wanaagsan ayaa ku faraysa in aad wanaajiso qofka ku xumeeyey oo aad xidhiidhiso ka ku jaray.

Waalidka ayaa ah dadka ugu mudan ee loo baahan yahay in lagu la dhaqmo dabeecad wanaagsan maxaa yeeley xigaalka ugu xaq mudan aadamaha ayaa ah waalidka. Lama amaaneyn in lagu adkaado oo lagu qalafsanaado waalidka, sababta oo ah waxa ay ku soo koriyeen adiga oo aan wax dheef ah lahayn dhib mooyee. Sidoo kale, dadka waaweyn, culimada iyo

dadka sharafta ku dhex leh bulshada ayaa iyaguna ay mudan tahay in lagula dhaqmo dhaqan wacan.

Dulqaadku waa sifo ka mid ah sifooyinka lagu garto qofka akhlaaqda wanaagsan. Xaqiiqda qadhaadhi waxa ay tahay in aanu qof kastaaba lahayn dulqaad; balse taa dhigeeda qof kastaaba waa uu jecel yahay qofka dulqaadka leh. *Haddii aan loo dulqaadan deelqaafka dadka, sidee ayay ku suurtoobi lahayd nolosheenu?*

Dhab ahaana, waxa sunaha adduunka ka mid ah in qofka yaraantiisa wanaajiya dadka waaweyn, waxa la wanaajiyaa marka uu weynaado. Sidoo kale, qofka yaraantiisa ku dheeldheela dadka waaweyn ee tixgalin waaya, isagana waxa laga jaraa markuu weynaado ee uu da' noqdo ee uu weliba u baahan yahay in la ciseeyo.

Ugu danbeyn, waxa aynu ku soo afmeeraynaa midhaha wanaagsan ee la goosto dabeecada iyo akhlaaqda wanaagsan. Walow ay fara badan yihiin haddana waxa aynu soo qaadan doonaa dhowrka qodob ee ugu muhiimsan. Tusaale ahaan;

1. Alle jaceykiisa ayaa lagu helaa akhlaaqda wanaagsan.
2. Waxa lagu mutaystaa jannada Eebbe.

3. Waxa lagu helaa sharaf iyo sumcad wanaagsan.
4. Waxa lagu kasbadaa saaxiib wanaagsan.
5. Waxa ay keentaa is jacayl bulshada dhexdeeda ah.

Talooyin iyo tilmaamo

1. *Lahow akhlaaq wanaagsan si aad u kasbato nolol wanaagsan oo badhaadhe badan.*
2. *Akhlaaqda wanaagsani waa sifo aad ku heli karto jacaylka Alle.*
3. *Markasta dadka ula dhaqan sida aad jeceshahay in laguula dhaqmo.*
4. *Markasta xasuusnow in waxa aad yaraantaada dhigato aad weynaantaada heli doonto.*

8. Dilaaga qarsoon

Sunta cagaaran ee qaadku waa aafu iyo dhibaato bulsheed oo ku habsatay umadda Somaliland iyo guud ahaan soomalida. Waa geed maandooriye ah. Waa shay badala maanka iyo maskaxda qofka. Waa geed naafeeya sharafta qofka. Waa geed curyaamiya dhaqaalaha qofka iyo qarankaba. Waa geed hagardaameeya habdhisyada kala duwan ee jidhka. Waa geed duullaan cad ku ah caafimaadka qof. Waa geed qofka u horseeda dib u dhac iyo dan la'aan nololeed. Waa geed aan la mahadin cidhibtiisa gebi ahaanba. Waa geed aan laysku khilaafsanayn in cunistiisa iyo ka ganacsigiisuba tahay xaaraan.

Qaadku waa geed ku baxa dhulka joogiisu sareeyo. Waa geed u baahan biyo badan si uu u baxo. Waxa ku baxa beeridiisa dhaqaale iyo howl aan yareyn.

Qaadka waxa dhaqaale xooggan uu ka soo galaa dowlada **Ethopia** ee xuduuda la leh Somaliland. Dhab ahaana, waxa uu qaadku ka mid yahay waxyaabaha ay lacagta iyo dhaqaalaha adagiba kaga baxdo Somaliland isla markaana ugu tagto dalka beera ee Ethiopia. Gobolada ugu badan ee laga beero qaadka waxa ka mid ah **Hawaday**, waana magalo ka mid ah gobolka **Oromiya** oo dhaca dhanka bari ee dalka Ethiopia juquraafi ahaan.

Qaadku wuxuu saameyn taban ku leeyahay dhinacyada kala duwan ee nolosha qofka, hadday tahay diin ahaan, dhaqaale ahaan, caafimaad ahaan, sharaf ahaan, horumar ahaan iyo weliba dhisme qoys ahaaneed. Haddaynu si kooban u xusno midkasta saameynta taban ee qaadku ku leeyahay dhinacyada nolosha, waxa kamida:

1. Diin ahaan

Waxa cad in qof u xadhko xidhay cunida qaadku adag tahay inuu guto waajibaadka uu Eebbe inagu waajibiyey, xitaa haddii u guto u gudan mayo sidii habooneyd ee loo baahna. Sababta uu badana qaadku u saameeyo diinta waxa kow ka ah, iyada oo cunida qaadka lagu qaato muddo iyo wakhti dheer taas oo fursad fiican siineyn cibaadaadka ay salaadu kow ka tahay. Waa mar uu qaadiroonayo iyo mar uu mirqaansanyahay, maba jirto fursad u bannaan addeecida Eebbe.

2. Dhaqaale ahaan

Qaadku wuxuu ugu tunweyn yahay waxyaabaha curyaamiya dhaqaalaha qofka iyo qoyskaba. Wuxuu xidada u siiba dhigaalka qofka u dhigmi lahaa ee uu ku tamarin lahaa timaada. Waxa uu qofka ka dhigaa haan gun la'a oo aan lahaynba wax kayd ah oo u yaala. Waxa kaga baxda qofka lacag uu dhigan lahaa mustaqbalka taas oo anfaci

lahayd. Sidoo kale, wuxuu qeyb libaax leh ka qaataa sixir-bararka ragaadiyey dalkeena.

3. Caafimaad ahaan

Waxa markhaati ma doona inuu qaadku saameyn xun ku leeyahay caafimaadka qofka aadamaha ah, kaa soo sababa xanuuno badan oo khatar oo xitaa mararka qaar sababi kara dhimasho. Waxa ka mid ah xanuunada uu sababo qaadku: wadne xanuun, xanuunada ku dhaca dhimirka (waalida), kansarka ku dhaca cunaha, wuxuu nabaro u sameeya afka, cunaha, caloosha iyo weliba meel kasta oo uu sii taabto, calool istaag, hurdo la'aan, iwm. Sidoo kale, wuxuu hagar daameeya habdhiska dheefshiidka qofka, taas oo uu khalkhaliyo habka loo burburiyo cuntada.

4. Sharaf ahaan

Caadaysashada cunida qaadku waxa ay hoos u dhigtaa sharaf iyo sumcada qofka maadama oo uu qofku u baahanayahay inuu soo iibsado qaad isla markaana hantidiisu ku filneyn wuxuu baryayaa qof qayrkii ah si uu lacag usiiyo isaga oo mararka qaar been sheegayaba si uu u helo lacag.

5. Dhismaha qoysnimo

Qaadku waa aafada ugu badan ee burburisa qoysaska soomaalida, maxaa yeeley marka uu

ninku qaylo kaliya wuxuu ka fuudh yeelaa qaadkiisa isla markaana wuxuu dayacayaa masuuliyadii ka saarneyd qoyskiisa. Taa dhigeeda, qaar badan oo ka mid ah ragga caadeystay qaadku waxa ay dayacaan masuuliyadoodii qoysnimo.

Shaki kuma jiro in qaadku yahay xaaran markaynu ka eegayno dhanka shareecada Islaamka, sababta oo ah dhibta uu geysnayo ayaa ka badan dheeftiisa. Sidoo kale, waxa uu waxyeeleeyaa maanka qofka sababtas oo ah waxa uu ku noqday maandooriye.

Ugu danbeyn, waxa muhiim ah in laga wada qaybqaato yareynta iyo xakameynta geedkan sunta ah. Sidoo kale, waxa aad u cad inuu qayb weyn ka yahay horumar la'aanta ka jirta geyigeenna. Waa in xukuumad iyo shacaba loo guntadaa sidii xididada loogu siibi lahaa geedkan ragaadiyey mustaqbalkii wadankeenna. Waa in culimada, aqoonyahanka, indheer-garadka, hogaanka, haldoorka, ganacsatada, waayeelka, haweenka, dhalinyarada iyo dhamaan bulshaduba ka howl gashaa sidii loo dabargoyn lahaa dhibaataada uu qaadku inagu hayo bulsho ahaan. Waa in la sameeyaa wacyi gelin balaadhan oo lagaga soo horjeedo dhibaataada qaadka ee xadhkaha goostay. Waa in mashaariic loo furaa dadkan uu qaadku xakameystay, oo laga shaqeysiiyo si looga mashquuliyoo cunida geedkan sumaysan.

1. *Iska jir isticmaalka geedkan sunta ah, ugana dig ehelkaaga, asaxaabtaada iyo cid kasta oo aad wanaag la jeceshahay.*
2. *Sababaha ama wadooyinka lagu joojiyo qaadka waxa kow ka ah in aad Alle dartii uga tagto oo aad ducada badiso in uu Alle wax ka khayr badan kuugu badalo.*
3. *Ka qayb ahow wacyi-gelinta lagu joojinayo qaadka.*
4. *Baro aqoon diineed iyo mid maadi ah ba si aad u ogaato dhibta geedkan sunta ah.*

TIXRAAC

F.G: Inta ugu badan ee xogta buuggani uu gudbinayo waxa ay ka soo maaxatay maskaxdayda marka laga reebo mawduuca DA'DA DAHABIGA AH oo aan intiisa dambe ee maareynta wakhtiga aan ka soo xigtay mareegyada internet-ka ee aan hoosta ku xusay. Inta kale waxa aan kasoo xigtay meelo kala duwan oo ay u badan tahay Qur'aanka kariim ka ah iyo axadiista nebigeeni suubana Muxamed (N.N.K.H).

1. <https://www.wanderlustworker.com/how-to-effectively-manage-your-time/>
2. <https://www.indeed.com/career-advice/career-development/time-management-skills>
3. <http://www.daryeelmagazine.com/maaraynta-waqtiga-time-management/>
4. <http://togdheernews.com/news/07/01/2015/maaraynta-waqtiga/>
5. <https://aftahannews.com/?p=42309>
6. <https://www.youtube.com/watch?v=KJLHlOIdqA4&t=641s>
7. Buugga la yidhaahdo WAKHTI TAGEY TIIGSIMAAD MA LEH ee uu qoray qoraaga la yidhaahdo C.RAXMAAN MAXAMED CIISE

ALLA MAHAD LEH

DHAMMAAD

“

*Nafta doonisteediyo
Damaceedu badanaa
Inay daansha daanshood
Ku dawaafto jecelaa
Dabar iyo hogaaniyo
Hadaan diini celinayn
Soo may durduriseen
Darafyada xumaaniyo
Danbiyada la sheegaba
Dusha may ku qaadeen.*

*Naxariista doorkaa
Adaa noogu deeqee
Daayinaw Ilaahaw
Qalbigayaga daahiri
Naga yeel digriga iyo
Qaar adkaarta daa'ima
Oon abidba daynayn.*

- Aamina Maxamed

”